

# Nidaamka la Raacayo ee Dib u cusboonaysiinta OHP

Nidaamkan la raacayo u isticmaal in uu kaa caawiyo sidii aad u buuxin lahayd foomkaaga Dib u cusboonaysiinta OHP Qaybta 2.

Tusmadda uu ka kooban yahay arjigu

Bilaabida hawsha .....	2
Talaabada 1 .....	4
Talaabada 2 .....	7
Talaabada 3 .....	8
Talaabada 4 .....	9
Talaabada 5 .....	11
Talaabada 6 .....	11
Talaabada 7 .....	12
Dib u soo celinta hantida.....	13
Xaaladda deganaansho ee loo qalmo .....	14
Nooca warqadaha socdaalka iyo lambarka warqadaha Aqoonsiga .....	15
Ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan ee OHA .....	17

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Naga soo wac 1-800-699-9075. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.



## Tilmaamo la xiriira buuxinta dib u cusboonaysiintaada.

- Saxiix dib u cusboonaysiintaada intaadan dirin ka hor.
- Si cad u qor.
- Mar labbaad fiiri su'aalahaaga.
- Xaqiiji in aad ka jawaabto su'aalaha loo baahan yahay oo idil.
- Taariikhaha oo idil qaab sax ah u qor. Tusaale ahaan, *MM/DD/YYYY*.
- Marnaba ha u isticmaalin “?” jawaab ahaan.

## Ma u baahan tahay taageero si aad u buuxiso dib u cusboonaysiintaada?

Dadka bulshada u adeega oo xirfad leh oo gobolka ku baahsan ayaa kaa caawin kara buuxinta dib u cusboonaysiintaada. Waa lacag la'aan.

Waxaad heli kartaa dadka bulshada u adeega oo kaa caawin kara in aad ka codsato [OregonHealthCare.gov](http://OregonHealthCare.gov).

Naga soo wac 1-800-699-9075 (TTY 711) si aad u hesho caawimaad ama u codsato liiska dadka bulshada u adeega ee degaankaaga. Waxaad codsan kartaa taageero lagugu siiyo luqad kale.

## Yaa ka tirsan qoyskaaga?

Waxaan rabnaa in aad tilmaan ka bixiso adiga iyo qof kasta oo kale oo qoyskaaga ka tirsan. Qoyskaaga waxaa ka mid ah dadka hoosta ku qoran:

- Adiga.
- Xaaskaaga sharciga ah.
- Carruurtaada. Ku dar dhammaan carruurta da'aha kala duwan ee aad sheegato in ay kugu tiirsan yihiin cashuur celintaada
- Qofka aad la nooshahay haddii ay carruuri idinka dhaxayso.
- Qof kasta oo kale oo aad ku darto cashuur celintaada federaalka; xataa haddii aysan adiga kula noolayn.

**Muhiim ah:** Ma jiraa qof kula nool oo aan ku jirin liiska dadka kor ku qoran? Haddii uu rabo caymis caafimaad, waa in uu buuxiyaa arji codsi oo kale.

## Dadka ay kala maqan yihiin qof ay isqabeen

Ma kala maqan yihiin qofkii aad isqabteen sidoo kale mana ogid miyaa sida qofka aad qabteeni u xarayn doono cashuurta? Xataa haddii aad wakhtiyadii la soo dhaafay u xaraysay “xaas isqaba oo si wada jir ah u xaraysanaya” uga jawaab su'aalahani canshuurta ku saabsan habka aad laftaadu sanadkan u xarayn doonto cashuurta. Haddii aadan xarayn doonin cashuur adiga kuu gaar ah, noo sheeg taasi.

Haddii aad og tahay in qofka aad isqabtaan uu kugu dari doono cashuur celintiisa federaalka, markaa adiga iyo qofka aad isqabtaan labbada waxay wadaagaan oo noqdaan koox xaraynaysa cashuurta. Waa in aad dib u cusboonaysiintaada ku dartaa qof kasta oo qayb ka ah kooxdaada xaraynaysa cashuurta.

Waa loo baahan yahay macluumaadka dakhliga ee qof kasta oo ka tirsan kooxdaada xaraynaysa cashuurta. Dadka qaybta ka ah kooxdaada xaraynaysa cashuurta, ee laakiin aan ka tirsanayn qoyskaagu, ma heli doonaan macluumaadka dacwadaada.

# BILAABIDA HAWSHA

## Halkeen ka heli karaa lambarkayga Aqoonsiga Dacwada:

Lambarkaaga Aqoonsiga Dacwadu wuxuu ku qoran yahay warqada la socota xirmadan. Waxaad ka heli doontaa sanduuq ku yaala bogga hore:

**Muhiim ah:** Kani waa Aqoonsiga dacwadaada: **XXXXXX**

Fadlan lambarkan ku qor wax kasta oo aad noo soo dirto. Lambarka dacwadaada la'aantii waxaa laga yaabaa in dib u dhac yimaado.

## Goorma ayaan ogaan doonaa in aan u qalmo?

Waan kuu sheegi doonaa haddii aad u qalanto OHP isla marka aan gaarno go'aan. Haddii dib u cusboonaysiintaadu aanay ahayn mid dhamaystiran, waxaa suuragal ah in aanu awoodi wayno in aan go'aan gaarno. Waxaan kuu soo diri doonaa warqad haddii aan u baahano macluumaad dheeraad ah. Fadlan sida ugu dhakhsaha badan uga soo jawaab codsigayaga.

Haddii aadan wax war ah naga maqli waydo muddo **45 maalmood gudahood ah**, waxaad codsan kartaa dacwad dhageysi. Si aad tani u samayso, waxaad isticmaashaa foomka Codsiga Dhegeysiga Maxkamadeed (*Administrative Hearing Request* -MSC 0443). Waxaad foomkan ka heli kartaa: <https://apps.state.or.us/Forms/Served/mi0443.pdf>. Sidoo kale waad na soo wici kartaa si aad u hesho nuqulka foomka.

*Ma leedahay baahi caafimaad oo dhakhso ah ama uur ma leedahay? Haddii ay sidaas tahay, hawsha arjigaaga si dhakhso ah ayaan u qaban karnaa. Waxaad xaqiijisaa in aad buuxiso su'aasha 2 ee ku qoran bogga hore ee dib u cusboonaysiintaada. Haddii aad isla hadaba dirtay dib u cusboonaysiintaada, Waxaad naga soo wici kartaa 1-800-699-9075 (TTY 711).*

# TALAABADA 1

Talaabada 1, fadlan wax nooga sheeg qof kasta:

- **Oo aad ku darayso qoyskaaga.** Tani wuxuu noqonayaa qof aanan ku qornayn warqadaada. Tusaale, waad guursatay ama waxaad dhashay ilme waxoogaa ka dib markii aad codsatay OHP sanadkii la soo dhaafay; AMA
- **Oo aad ka saarayso qoyskaaga.** Tani macnaheedu waa waxaad rabtaa in aad qoyskaaga ka saarto qof ku qoran warqadaada. Tusaale, waxaad qof isfurteen waxoogaa ka dib markii aad codsatay OHP sanadkii la soo dhaafay; AMA
- **Oo hada ka tirsan qoyskaaga, oo laakiin aanan hada helayn gargaarada.** Tani macnaheedu waa waxay ku qoran yihiin warqadaada, laakiin hada ma helayaan gargaarada OHP. Tusaale, markii aad codsatay OHP sanadkii la soo dhaafay, waxaad codsatay keliya caymiska carruurtaada oo hadana waxaad jeclaan lahayd in aad adiga laftaadu hesho gargaarada OHP.

---

## 1. Ma waxaad ku daraysaa ama ka saaraysaa qof ka tirsan qoyskaaga mise waxaad gargaaro u codsanaysaa qof ka tirsan qoyskaaga oo aan hada helaynin gargaaro?

Fiiri bogga 2 wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan cida ay tahay in lagu daro qoyskaaga.

---

## 3. Haddii qofkani uu codsanayo caymiska OHP, ma leeyahay Lambarka Social Security-ga (SSN)?

Bixinta SSN-ku waajib maaha, haddii aadan codsanayn, laakiin bixinta SSN waxay dedejin kartaa hawsha arjiga. SSN ayaa looga baahan yahay qof kasta oo codsanaya caymis caafimaad sidoo kalena leh mid.

Haddii aad doonayso in lagaa caawiyo helitaanka SSN, fadlan naga soo wac 1-800-699-9075 ama 711 (TTY).

---

## 8. Qoftani uur ma leedahay?

Haddii aadan garanayn taariikhda dhalimada ee qoftani ku aadan tahay, waxaad sheegtaa taariikhda aad u malaynayso ama qiyaas taariikhda dhalimadeedu ku aadan tahay. Haddii aad garanayso tirada carruurta ay qoftani filayso, qor tiradaasi. Haddii aadan garanayn, sideeda u dhaaf go'aan ayaan ka gaari doonaa u qalmideeda iyadoo ay ku xiran tahay "1". Haddii taariikhda dhalimadeedu ama tirada carruurta ay filayso isbeddesho, na soo wac si aad noola socodsii. Naga soo wac 1-800-699-9075 (TTY 711).

---

## 11. Qofkani ma yahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska?

Waxaan u sharaxnaa in Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ay yihiin mid ka mid ah kuwa soo socda:

- Xubin ka tirsan tahay qabiil, isbahaysi, ama koox ay dowladda federaalku aqoonsan tahay.
- Eskimo ama Aleut ama Dhaladka Alaska ee kale ee uu diiwaan-geliyay Xoghayaha Arrimaha Gudaha iyadoo la raacayo Xeerka Caddaynta Dejinta Dhaladka Alaska, 43 U.S.C. 1601.
- Qof uu Xoghayaha Arrimaha Guduhu u tixgelinayo in uu yahay/tahay Hindida Maraykanka ujeedo kasta ha ahaatee.

Waxaad fiirisaa xeerarka kale ee gaarka ah ee loogu tala galay Hindida Maraykanka iyo Dhaladka Alaska:

- Talaabada 1, su'aasha 16 ee ku qoran boggaga 5-6.
- Talaabada 4, su'aasha 3 ee ku qoran bogga 10.

## 14. Qofkani ma leeyahay xaalad deganaansho oo loo qalmo?

Haddii qofkani aanu ahayn muwaadin Maraykan ah ama qof aanan u dhalan meel hoos timaada Maraykanka, waxaa suuragal ah in uu wali u qalmo OHP. Ka jawaabida su'aashani waxay naga caawinaysaa in aan go'aansano waxa uu u qalmo.

Waxaad isticmaashaa liiska ku qoran bogga 14 ee tilmaantan la raacayo si aad uga jawaabto su'aasha ku saabsan xaaladda deganaansho ee loo qalmo. Haddii aad liiska ka aragto sida ay tahay qofkan xaaladiisa deganaansho, calaamaddee "HAA."

**Fiio Gaar ah:** Liiska ku qoran bogga 14 waa in loo isticmaalo tilmaan ahaan kaliya. Qofkani waxaa laga yaabaa in uu u qalmo adeegyada deg dega ah, xataa haddii aad xaaladiisa deganaansho ayna ku qornayn bogga 14. Qofka aan lahayn xaalad deganaansho oo uu qalmo ama aan sharciga lahayn, waxaa suuragal ah in uu wali u qalmo adeegyada degdega ah. Adeegyada degdega ah waxaa ka mid ah uur lahaanshaha iyo kharashyada dhalmada la xiriira.

## 16. Noo sheega daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO) ee uu qofkani xusho

Daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO) waa nidaam isku xiran oo ka kooban daryeel caafimaad bixiyayaasha kuwaasi oo ay ka mid yihiin dhakhaatiir, dhakhtarada ilkaha iyo la taliyayaal degaankaaga ka jira. Daryeel bixiyayaashani si wadajir ah ayay u wada shaqeeyaan si loo xaqiijiyo in daryeelkaagu uu diirada ku saaro.

Si aad u hesho liiska CCO-yada iyo qorshayaasha ilkaha ee degaankaaga ka jira sidoo kalena u ogaato waxyaalo dheeraad ah oo iyaga ku saabsan, booqo [OHP.Oregon.gov.w](http://OHP.Oregon.gov.w)

Haddii qofkani yahay xubin ka tirsan qabiilka Hindida oo uu isla markaana xulan waayo CCO, waxaa caymiskiisa dabooli doona kaar furan (open card) ilaa uu ka dooranayo in uu isqoro CCO. Haddii uu yahay xubin ka tirsan qabiilka Hindida, waxaa loo xuli doonaa CCO iyadoo ay ku xiran tahay halka uu ku nool yahay.

Kaar furan (open card) ama kharashka adeega la bixiyo "fee-for-service" macnaheedu waa wuxuu arki karaa daryeel bixiye kasta oo qaata caymiska dadka ka tirsan Qorshaha Caafimaadka Oregon.

### Fikraddo ku saabsan sida loo xusho CCO

- Waxaad wacdaa dhakhtarka ama xarunta caafimaadka ee qofkani hada isticmaalo (haddii uu leeyahay). Waydii CCO-ga ay qaataan.
- Waxaad ogaataa haddii daryeel bixiyayaasha ka tirsan CCO ay u dhow yihiin halka uu qofkani ku nool yahay.
- Waxaad ogaataa CCO-ga liiska ku jira ee dagaanka qofkani ka tirsan yahay. Waxaad wacdaa CCO ama booqo website-yada ay leeyihiin si aad u ogaato dhakhaatiirta, kalkaalisoooyinka caafimaad, xarumaha caafimaad, isbitaalada, farmashiyayaasha, dhakhtarada ilkaha iyo daryeel bixiyayaasha caafimaadka dhimirka ee ka tirsan CCO.
- Lambarada telefoonka iyo cinwaanada website-ka ee CCO kastaa waxay ku qoran yihiin internet-ka [OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov).
- Waxaad wacdaa waaxda adeegyada xubnaha CCO si aad u ogaato sharciyada la xiriira u tegida qof takhasus leh.

### Macluumaadka qabiilka

Hindida Maraykanka, Dhaladka Alaska iyo dadka heli kara daryeelka iyagoo adeegsanaya Adeegyada Caafimaadka Hindida waxay xulan karaan in ay is-qoraan CCO (meesha laga heli karo). Haddii ay is-qoraan CCO, waxay weli adeegyo ka heli karaan Adeegyada Caafimaadka Hindida, Barnaamijyada Hindida Magaalada ama bukaan socod eegtooyinka qabiilka.

Waxaan u sharaxnaa in Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ay yihiin mid ka mid ah kuwa soo socda:

- Xubin ka tirsan tahay qabiil, isbahaysi, ama koox ay dowladda federaalku aqoonsan tahay.
- Eskimo ama Aleut ama Dhaladka Alaska ee kale ee uu diiwaan-geliyay Xoghayaha Arrimaha Gudaha iyadoo la raacayo Xeerka Caddaynta Dejinta Dhaladka Alaska, 43 U.S.C. 1601.
- Qof uu Xoghayaha Arrimaha Guduhu u tixgelinayo in uu yahay/tahay Hindada Maraykanka ujeedo kasta ha ahaatee.

Haddii qofkani buuxiyo mid ka mid ah sharaxaadaha kor ku qoran oo uu rabo in uu isqoro CCO waa in uu noo sheegaa nooca CCO uu jecel yahay.

# TALABADA 1

## 16. Noo sheega daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO) ee uu qofkani xusho

### Medicare

Haddii qofkani leeyahay caymiska Medicare, loogama baahna in uu ka tirsanaato CCO. Markasta isqoridiisa wuxuu ka dhigi kataa kaar furan (open card). Waxaad xaqiijisaa in daryeel bixiyuhu sidoo kale qaato caymiska Medicare iyadoo ay Medicare tahay lacag bixiyaha koowaad inta aan la gaarin OHP Fadlan naga soo wac 1-800-699-9075 (TTY 711) haddii aad hayso su'aalo ku saabsan tani.

## 17. Daryeelaha koowaad

Waxaa suuragal ah in qofkani u qalmo OHP haddii uu yahay daryeelaha koowaad ee ilme ay da'diisu ka yar tahay 19 oon ahayn ilme uu isagu dhalay. Ilmuhu waa in uu uu la nool yahay isaga oo ay qaraabo yihiin. Daryeelaha koowaad waa qofka ugu muhiimsan ee leh mas'uuliyadda daryeel ee ilmaha.

## 18. Biilasha caafimaadka ee aan la bixin

Qofkani ma haystaa biilasha caafimaadka oo ah saddexdii bilood ee la soo dhaafay oo uu baahan yahay taageero la xiriirta bixintooda? Haddii ay jawaabtu haa tahay, wuxuu u qalmi karaa OHP, si ay uga caawiso bixinta biilashani, muddo ilaa saddex bilood ah ka hor intaanu codsan.

Biilasha caafimaadka, waxaan ula jeednaa cadadka lacageed ee ay tahay in aad bixiso ee loogu tala galay:

- Aadida Dhakhtarka ama dhakhtarka ilkaha;
- Qalabka maqalka kordhiya, muraayadaha indhaha ama qalabka kale ee caafimaad ee waaraya;
- Daawooyinka uu qoray dhakhtar;
- Booqashada isbitaalka;
- Lacagta qofka ku soo aada ee caymiska caafimaad, kharashyada, qaybta lacagta kaaga soo aada "copayment", lacagaha la iska jaro iyo lacagaha kale ee la bixiyo;
- Gaadiidka lagu aado balamaha caafimaad.

**Fiuro Gaar ah:** OHP waxay kaliya lacagta siin kartaa **daryeel bixiyayaasha** iyadoo la xiriirta adeegyada caafimaad ee ay bixiyeen. OHP dib qofkan uma siin karto lacagta wixii biilal ah ee uu isla hadaba bixiyay.

## 21/22/23. Su'aalaha la xiriira naafanimada

Qaar ka mid ah dadka naafada ahi waxay u qalmaan caymis caafimaad oo dheeraad ah. Haddii qofkani helayo SSI ama Medicare, ama uu ka weyn yahay 65 jir, barnaamijka Dadka Waayeelka ah ee Naafada ah (Aging and People with Disabilities - APD) ama Hay'ada Dadka Waayeelka ah (Area Agency on Aging - AAA) waxaa suuragal ah in ay kuu soo diraan macluumaad ku saabsan faa'iidooyinka kale ee jira.

## TALAABADA 2

Fadlan ka jawaab su'aalaha ku qoran Talaabada 2 ee dadka ku qoran warqadaada Dib u cusboonaysiinta OHP Qaybta 1.

### 1. Miyuu isbeddelay cinwaanka gurigaagu?

Haddii uu cinwaanka gurigaagu isbeddelay, fadlan na sii cinwaankaaga cusub, haddii aad leedahay. Waxaad xaqiijisaa in aad raaciso Zip code-kaaga. Waxaan u baahanay ZIP code-ka cinwaanka gurigaaga si aan u xaqiijino in aad isqorto qorshe caafimaad oo u adeega degaankaaga.

Haddii aanad lahayn cinwaan guri, fadlan noo sheeg gobolka, Zip code-ka iyo degaanka aad ku qaadato wakhtigaaga intiisa badan.

### 2. Miyuu isbeddelay cinwaankaaga boostadu?

Haddii uu cinwaankaaga boostadu isbeddelay, fadlan na sii cinwaankaaga cusub, haddii aad leedahay.

Waxaad bixisaa cinwaan boosto haddii:

- Aadan warqadaha boostada ku helin cinwaanka guriga aad leedahay; ama
- Aadan lahayn cinwaan guri, ama
- Aad qabto walwal dhanka ammaanka ah, oo ay ka mid tahay rabshadaha qoysku.

**Fiiro Gaar ah:** Cinwaankaaga boostadu wuxuu noqon karaa cinwaan kasta oo boosto oo aad ku heli karto. Kani wuxuu noqon karaa cinwaanka saaxiib, xubin ka tirsan qoyska, urur, iwm

### 5. Qof gurigaaga ka tirsani uur ma leedahay?

Haddii aadan garanayn taariikhda dhalmadaadu ku aadan tahay, waa in aad sheegtaa taariikhda aad u malaynayso ama qiyaas taariikhda dhalmadaadu ku aadan tahay. Haddii aad garanayso tirada carruurta aad filayso, qor tiradaasi. Haddii aadan garanayn, sideeda u dhaaf go'aan ayaan ka gaari doonaa u qalmidaada iyadoo ay ku xiran tahay "1". Haddii taariikhda dhalmadaada ama tirada carruurta aad filaysaa ay isbeddesho waad na soo wici kartaa si aad noola socodsiiiso.

### 10. Ma rabtaa in aad beddesho daryeelkaaga urruradu iska kaashadeen (CCO)?

Waad beddeli kartaa CCO-gaaga marka aad dib u cusboonaysiiiso caymiskaaga.

Si aad u hesho liiska CCO-yada iyo qorshayaasha ilkaha ee degaankaaga ka jira sidoo kalena u ogaato waxyaalo dheeraad ah oo iyaga ku saabsan, booqo [OHP.Oregon.gov](http://OHP.Oregon.gov).

#### Fikraddo ku saabsan sida loo xusho CCO

- Waxaad wacdaa dhakhtarka ama xarunta caafimaadka ee aad hada isticmaasho (haddii aad leeyahay). Waydii CCO-ga ay qaataan.
- Waxaad ogaataa haddii daryeel bixiyaasha ka tirsan CCO ay u dhow yihiin halka aad ku nooshahay.
- Waxaad wacdaa CCO ama booqo website-ka ay leeyihiin si aad u ogaato dhakhaatiirta, kalkaalisoooyinka caafimaad, xarumaha caafimaad, isbitaalada, farmashiyayaasha, dhakhtarada ilkaha iyo daryeel bixiyayaasha caafimaadka dhimirka ee ka tirsan CCO.
- Waxaad wacdaa waaxda adeegyada xubnaha CCO si aad u ogaato sharciyada la xiriira u tegida qof takhasus leh.

**Fiiro Gaar ah:** Haddii aad tahay Hindida Maraykanka ama Dhaladka Alaska ama aad leedahay caymiska Medicare, markasta ayaad ku biiri kartaa, beddeli kartaa ama ka tegi kartaa CCO.



## TALABADA 3

### 1. Ma jiraa qof ku qoran Dib u cusboonaysiintaada OHP oo raba in uu sheego isbeddelka ku yimid xaraynta cashuur celintiisa MISE waxaad ku daraysaa qof ka tirsan qoyskaaga?

Fiiri bogga 2 ee tilmaantan la raacayo adigoo ka fiirinaya macluumaadka cida ay tahay in aad ku darto qoyskaaga.

Isbeddelka waxaa ka mid ah wax kasta oo ka duwan wixii aad hore noogu sheegtay. Tusaale ahaan: isbeddel ku yimid xaas isqaba oo si wada jir ah u xaraysanaya marka loo eego kali ahaan; sheegashada dad ku tiirsan oo ka badan ama ka yar intii hore; qof ku tiirsanaa qofkale cashuurtiisa oo laakiin aan mar dambe sidaa noqon doonin.

Kama jawaabi karno su'aalaha gaarka ee la xiriira sida ay tahay in aad u buuxiso foomamkaaga cashuurta. Si looga wada hadlo su'aalaha la xiriira sida loo buuxinayo foomamka cashuurta, fadlan booqo [IRS.gov](https://www.irs.gov) ama waydii qof khibrad u leh cashuurta.

### Ma kala maqan yihiin qofkii aad isqabteen sidoo kale mana ogid miyaa sida qofka aad qabteeni u xarayn doono cashuurta?

Ma kala maqan yihiin qofkii aad isqabteen sidoo kale mana ogid miyaa sida qofka aad qabteeni u xarayn doono cashuurta? Xataa haddii aad wakhtiyadii la soo dhaafay u xaraysay "xaas isqaba oo si wada jir ah u xaraysanaya" uga jawaab su'aalahani canshuurta ku saabsan habka aad laftaadu sanadkan u xarayn doonto cashuurta. Haddii aadan xarayn doonin cashuur adiga kuu gaar ah, noo sheeg taasi.

Haddii aad og tahay in qofka aad isqabtaan uu kugu dari doono cashuur celintiisa federaalka, markaa adiga iyo qofka aad isqabtaan labbada waxay wadaagaan oo noqdaan koox xaraynaysa cashuurta. Waa in aad arjigaaga ku dartaa qof kasta oo qayb ka ah kooxdaada xaraynaysa cashuurta.



## TALAABADA 4

Talaabada 4, waxaan kaaga baahanahay in aad noo sheegto dakhliga aad ka hesho shaqada, dakhliga shaqada shakhsi ahaan aad u shaqaysato, dakhliga kale ee cashuurta laga qaadi karo iyo noocyada lacagaha la iska jaro ee aad sheegato cashuur celintaada federaalka.

Waxaan u baahanahay macluumaadka dakhliga ee qof kasta oo qoyskaaga ka tirsan. Fiiri bogga 2 ee tilmaantan la raacayo adigoo ka fiirinaya macluumaadka cida ay tahay in aad ku darto qoyskaaga. Haddii aadan qof ka durayn qoyskaaga oo dhakhligaaga/lacagaha lagaa jaro ayna isbeddelin tan iyo sanadkii la soo dhaafay, ku jawaab MAYA su'aalaha ku qoran Talaabada 4.

### **MUHIIM AH: Soo dirida cadaynta**

Soo dirida aad soo dirayso cadaynta dakhliga ee aad soo raacinayso dib u cusboonaysiintaada waxay naga caawin kartaa in aan hawsha macluumaadkaaga si dhakhso ah u qabano. Fadlan soo dir cadaynta haddii:

- Dakhligaagu isbeddelay labbadii billood ee la soo dhaafay, ama aad filayso in uu beddelo bisha soo socota gudaheeda.
- Haddii aad iskaa u shaqaysato.

Haddii aad cadaynta soo diri waydo anagoo u baahan, waxaanu kuu soo diri doonaa warqad xasuusina.

Haddii cadaynta aad soo dirto ay la mid noqon weydo lacagta aad ku qorto Talaabada 4, noo sheeg sababta. Tusaale, "Nuqulka jeegaygu waa kii bishii la soo dhaafay waxaan hadda shaqeeyaa waxka ka yar saacadihii hore," ama "iskay ayaan u shaqaystaa iyadoo bishii la soo dhaafayna aan qabtay shaqo dheeraad ah."

Marka ay noqoto cadaynta dakhli kasta ee aad soo dirto, waxaad qortaa magaca iyo dhalashada qofka helay.

### **1. Ma jiraa qof ku qoran Dib u cusboonaysiintaada OHP oo raba in uu sheego isbeddelka ku yimid dakhligiisa cashuurta laga qaadi karo ee shaqada MISE waxaad ku daraysaa qof ka tirsan qoyskaaga oo shaqada ka hela lacag cashuur laga qaadi karo?**

Fadlan noo sheeg tirada lacagta ee adiga iyo qof kasta oo kale oo qoyskaaga ka tirsani ay hada shaqada ka sameeyaan. Fiiri bogga 2 ee tilmaantan la raacayo adigoo ka fiirinaya macluumaadka cida ay tahay in aad ku darto qoyskaaga.

Fadlan qor dakhliga "lacagta aad samayso" -- lacagta la helay **ka hor intaan** wax cashuur ah ama lacago kale laga jarin. Haddii lacagta mushaharkaagu isbeddesho toddobaad kasta, geli tirada lacagta aad filayso in aad hesho bisha oo dhan, ama geli lacagta aad heli doonto adigoo ku salaynaya tirada celceliska saacadaha aad shaqaynayso hada.

**Tusaalooyinka cadaynta aad soo diri karto:** nuqulada jeegagii u dambeeyay ama warqad ka socota shirkadda aad u shaqayso.

### **2. Ma jiraa qof ku qoran Dib u cusboonaysiintaada OHP oo raba in uu sheego isbeddelka ku yimid shaqada uu iskii u shaqeysto MISE waxaad ku daraysaa qof ka tirsan qoyskaaga oo lacag ka hela shaqada uu iskii u shaqeysto?**

Fadlan noo sheeg tirada lacagta ee adiga iyo qof kasta oo kale oo qoyskaaga ka tirsani ay hada ka sameeyaan shaqada iskaa loo shaqeysto. Fiiri bogga 2 ee tilmaantan la raacayo adigoo ka fiirinaya macluumaadka cida ay tahay in aad ku darto qoyskaaga.

Fadlan qor "lacagta" la sameeyo -- lacagta la helay **ka hor intaan** dhamaan kharashyada ganacsiga ku baxa laga jarin. Waxaad waxyaalo dheeraad oo ku saabsan shaqada iskaa loo shaqaysto, lacagta qofku sameeyo iyo kharashyada la iska jari karo ka akhriyi kartaa [IRS.gov/individuals/Self-Employed](https://www.irs.gov/individuals/self-employed). Fadlan soo dir cadaynta wixii isbeddelo ah uu ku yimaada shaqada iskaa loo shaqaysto.

### Tusaalooyinka cadaynta ee aad soo diri karto:

- Foomamka cashuurta. Waa CAADI haddii foomamka cashuurta ay yihiin kuwii sanadkii hore. Tusaale, haddii aadan xarayn foomamkaagii cashuurta ee 2015-kii, waxaad soo diri kartaa foomamkaagii cashuurta ee 2014-kii, (ee la xareeyay 2015-kii). Haddii dakhliga sanadkii hore aanu la mid ahayn dakhliga sanadkan, waxaad soo raacisaa qoraal tilmaamaya sababta. Tusaale, “Sanadkan macaamiil badan maan helin.”
  - Nuqulada diiwaanada lacagta la bixiyo lagu qoro, qandaraasyada, heshiisyada shaqada iyo xaashiyaha risiitka ee iibka.
  - Biilasha la diray haddii ay muujiyaan taariikhda ganacsigaagu lacagta uu helay.
  - Jadwalo ay la socoto tirada lacageed ayna ku qoran tahay taariikhaha ganacsigu helay lacagta.
  - Qoraalada cashuurta oo gacanta lagu qoray oo ka socda macaamiisha kuwaasi oo tilmaamaya tirada lacagta la bixiyay ama taariikho gaar ah.
3. **Ma jiraa qof ku qoran Dib u cusboonaysiintaada OHP oo raba in uu sheego isbeddelka ku yimid dakhligiisa cashuurta laga qaadi karo ee kale oo aan laga helin shaqo ama shaqada iskaa loo shaqaysto MISE waxaad ku daraysaa qof ka tirsan qoyskaaga oo hela dakhliga cashuurta laga qaadi karo oo kale oo aan laga helin shaqo ama shaqada iskaa loo shaqaysto?**

Fadlan noo sheeg dakhliga adiga iyo qof kasta oo kale oo qoyskaaga ka tirsani ay hada ka helaan meel aan ka ahayn shaqo. Fiiri bogga 2 ee tilmaantan la raacayo adigoo ka fiirinaya macluumaadka cida ay tahay in aad ku darto qoyskaaga.

***Ha ku darin masruufka carruurta, dakhliga ilmo korsiga, lacagaha la siiyo dadka soo halgama, Taageerada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF) ama Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI).***

**Dakhliga Cashuurta laga qaadi karo ee Qabiilka** – Noocyada dakhli ee qabiilka ee hoosta ku qoran waxaa suuragal ah in aan loo xisaabin go'aan ka gaarida u qalmida Qorshaha Caafimaadka Oregon, laakiin waa in aad dakhligan ku dartaa qaybtan oo sidoo kalena noo sheegtaa nooca dakhliga qabiilka ee uu yahay. Soo raaci:

- Lacagaha laga helo qabiil ee ka yimaada khayraadka dabiiciga ah, isticmaalka waxyaalo xaq loo leeyahay, ijaarka ama lacagaha la siiyo mulkiilaha (oo aanay la socon lacagaha qabiiladu ka helaan kasiinada (casino))
- Lacagaha laga helo khayraadka dabiiciga ah, beeraha, beeraha waaweyn, kaluumaysiga, ijaarka ama lacagaha la siiyo mulkiilaha ee laga helo dhulka ay Wasaaradda Arrimaha Guduhu u qoondaysay inuu noqdo dhul Hindida Maraykanku leeyihiin (kuwaasi oo ay ka mid yihiin dhulka ay maamulaan iyo dhul hore ay u maamuli jireen)
- Lacagta laga helo gadida waxyaalaha dhaqan ahaan muhiimka ah

***Fiiri Gaar ah:*** Haddii aad dakhli ka hesho qabiilka taasi oo ah lacag laga helo kasiinada (casino), waxaad dakhligaasi gelisaa oo ku qortaa sadarka ay ku qoran tahay “Lacagaha qabiiladu ka helaan kasiinada (casino)” ee “Nooca dakhliga kale.”

**Tusaalooyinka cadaynta ee aad soo diri karto:** nuqulada jeegaga, warqadaha abaalmarinta ama cadayn qoraal ah oo kale.

4. **Ma jiraa qof ku qoran Dib u cusboonaysiintaada OHP ama qof aad ku darayso qoyskaaga oo dakhli ka hela Gargaarada Social Security-ga (SSB) ama faa'iidooyinka Caymiska Naafanimada Social Security-ga (SSDI)?**

Fadlan noo sheeg dakhliga adiga iyo qof kasta oo kale oo qoyskaaga ka tirsani ay hada ka helaan Gargaarada Social Security-ga (SSB) ama faa'iidooyinka Caymiska Naafanimada Social Security-ga (SSDI) Fadlan qor lacagaha cashuurta laga qaadi karo iyo kuwo aan cashuurta laga qaadi karin labbadoodaba Fiiri bogga 2 ee tilmaantan la raacayo adigoo ka fiirinaya macluumaadka cida ay tahay in aad ku darto qoyskaaga.

**Tusaalooyinka cadaynta ee aad soo diri karto:** nuqulada jeegaga, warqadaha abaalmarinta ama cadayn qoraal ah oo kale.

## TALAABADA 4

**5. Ma jiraa qof ku qoran Dib u cusboonaysiintaada OHP oo raba in uu sheego isbeddelka ku yimid lacagaha la iska jaro ee uu ku sheegto cashuur celintiisa federaalka ama lacagaha kale ee la iska jaro ee la ogol yahay MISE waxaad ku daraysaa qof ka tirsan qoyskaaga oo sheegta lacagaha kale ee la iska jaro ee la ogol yahay?**

Wax inooga sheeg lacagaha la iska jaro ee adiga iyo qof kasta oo qoyskaaga ka tirsani aad sheegan doontaan cashuur celintiina federaalka. Fiiri bogga 2 ee tilmaantan la raacayo adigoo ka fiirinaya macluumaadka cida ay tahay in aad ku darto qoyskaaga.

Caadiyan, haddii aad sheegato in lacag laguugu xisaabiyo cashuur celintaada federaalka markaa kharash ahaan sidoo kale ugama jari kartid isla sanad cashuureed isku mid ah. Booqo [www.IRS.gov](http://www.IRS.gov) si aad u ogaato waxyaalo dheeraad ah.

Lacagaha la iska jaro waxaa ka mid ah: lacagta labada isqaba mid ka mid ah bixiyay; lacagta arday deynta waxbarasho u qaatay; kharashyada macalinka, lacagta waxbarashada iyo gunada la iska qaado ee dugsiga; iyo dakhliga Hindida Maraykanka/Dhaladka Alaska.

Kama jawaabi karno su'aalaha gaarka ee la xiriira sida ay tahay in aad u buuxiso foomamkaaga cashuurta. Su'aalaha ku saabsan sida loo buuxinayo foomamka cashuurta ama lacagaha la iska jaro/ kharashyada la ogol yahay, fadlan booqo [www.IRS.gov](http://www.IRS.gov) ama la hadal qof khibrad u leh cashuurta.

## TALAABADA 5 Caymis caafimaad oo kale

**1. Ma jiraa qof ku qoran Dib u cusboonaysiintaada OHP oo yeeshay isbeddel ku yimid caymis caafimaad (ee aan ahayn caymiska OHP) oo haysta caymis, loo fidiyay ama u qalma MISE waxaad ku daraysaa qof ka tirsan qoyskaaga oo haysta caymis, loo fidiyay ama u qalma caymis caafimaad?**

Tusaalooyinka caymis caafimaad oo kale waxaa ka mid ah:

- Caymis caafimaad oo gaar ah adiga ama qof kale ma bixiyaan, sida caymis maxkamad amartay in la bixiyo;
- Caymiska aad heli karto ama aad ka heli karto shirkad aad u shaqayso;
- Caymiska uu bixiyo waalid maqan;
- Caymiska la helo iyadoo hawl-gabnimo laga faa'iidayo (sida ciidanka);
- Caymiska aad ku hesho dugsiga;
- Wixii caymis ah ee caymiskaaga bixinaya xataa haddii aadan ka heli karin halka aad ku nooshahay;
- Faa'iidooyinka Medicaid ama Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta (CHIP) oo laga helo gobol kale.

## TALAABADA 6

Haddii ay leedahay shirkad aad u shaqayso oo bixisa caymis caafimaad, fadlan buuxi Talaabada 6. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan sida loo buuxiyo foomka, fadlan la xiriir shirkadda aad u shaqayso.

Haddii qof ka mid ah gurigaagu ee leeyahay caymis caafimaad, oo la ogaaday in uu u qalmo OHP, waxaa suuragal ah in Gobolka Oregon dib kuu siiyaan qaybta caymiska ee aad bixiso. Fadlan buuxi Talaabada 6 si aan u go'aansan karno in aad u qalanto in lacag dib lagu siiyo. Haddii aan u baahano macluumaad dheeraad ah waan kula soo xiriiri doonaa.

## TALAABADA 7

Marka aad saxiixdo dib u cusboonaysiinta, waxaad oggolaanaysaa dhammaan warbixinnada ku qoran Talaabada 7.

Waxaad xaq u leedahay:

- In aad waydiiso su'aalo ku saabsan barnaamijyadayada, lacag bixinta iyo adeegyada
- In aad la hadasho qof mas'uul ah
- Aad cosdato rasiidka warqadaha aad na siiso
- In aad go'aanka laga gaaray u qalmidaada ku hesho mudo 45 maalmood gudahood ah
- In aad codsato rafcaan haddii aanad ku raacsanayn go'aanka laga gaaray Ogaysiintaada u Qalmida (Eligibility Notice)
- Waxaad haysataa 90 maalmood laga soo billaabo taariikhda Ogaysiinta u Qalmida si aad u codsato rafcaan. Si aad tani u samayso, waa in aad isticmaashaa foomka Codsiga Dhegeysiga Maxkamadeed (Administrative Hearing Request - MSC 0443). Waxaad foomkan ka heli kartaa internet-ka adigoo booqanaya <https://apps.state.or.us/Forms/Served/mi0443.pdf> ama hel nuqulka foomka adigoo na soo wacaya.
- In aad daryeel bixiyayaasha caafimaadka u sheegto haddii aad leedahay caymis caafimaad oo kale. Waa in ay kharashka u diraan caymiska kale ka hor inta aysan u soo dirin OHP kharashka daryeelkaaga caafimaadka.
- In aad codsato sidoo kalena isticmaasho faa'iidooyinka kale iyo lacagta aad u qalanto. Tani waxay sidoo kale khuseysaa dadka kale ee aad taageerada u helayso.
- In aad ogolaato bixinta macluumaadka ku saabsan masruufkaaga carruurta ee laga helo Waaxda Cadaalada iyo Qaybta Masruufka Carruurta ee la siinayo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHP) iyadoo wakiil ka ah OHP.
- Waxyaabaha aad u sheegto OHA waxaa laga dhigi doonaa *kuwo sir ah* oo si gaar ah *loo ilaaliyo*. OHA waxay raacaysaa "Ogaysiiska Dhacdooyinka Asturan" ee ka muuqda dhammaadka tilmaantan la raacayo.

### Wada-shaqaynta lala yeelanayo taageerada caafimaad

Aqbalaada aad aqbalayso Taageerada Caafimaad, waxaad Barnaamijka Masruufka Carruurta ee Oregon u ogolaanaysaa hirgelinta taageero dhanka caafimaadka ah oo laga helo waalidka ilmaha dhalay ee maqan (waalid aan la noolayn ilmaha). Tani waxaa ka mid ah la shaqaynta Barnaamijka Masruufka Carruurta si aad u hesho lacagta taageerada caafimaadka iyo caymiska caafimaad si ay kaaga caawiso in aad bixiso kharashyada caafimaad ee ilmahaaga iyadoo laga helayo waalidka maqan.

Waa in aad Barnaamijka Masruufka Carruurta taageero ka siisaa helidda waalidka maqan adiga oo haya sabab fiican oo aadan taasi u samaynaynin maahane, sida rabshada qoyska. Tani waxaa loogu yeeraa haysashada sabab fiican "good cause" oo la iskaga reebayo. Haddii la go'aansado in aad la shaqayso Barnaamijka Masruufka Carruurta si loo sameeyo ama loo hirgeliyo masruufka carruurta oo aad la shaqayn waydo, waxaa suuragal ah in aad lumiso taageerada caafimaad.

Si aad u codsato sabab fiican "good cause" ama haddii aad hayso su'aalo ku saabsan sabab fiican "good cause," naga soo wac 1-800-699-9075 (TTY 711). Tani macnaheedu waa marka la shaqeynta barnaamijka masruufka carruurta uu khatar gelinaayo adiga ama carruurtaada.

## Dib u soo celinta Hantida

Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida waxaa loogu tala galay xubnaha helaya adeegyada daryeelka mudada fog. Sida ku cad barnaamijkaas, marka qof xubin ah oo helayay Medicaid uu geeriyoodo, xaaladdo gaar ah oo kooban OHA waxay dib u soo ceshan doontaa qaarka mid ah hantidii qofka xubinta ah ama dhammaan lacagtii ku baxday daryeelka mudada fog, taageeradii iyo faa'iidooyinkii caafimaad. Lacagta uu soo ceshaday Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida waxaa dib loogu celiyaa barnaamijyada OHA iyo DHS si loogu taageero dadka kale.

### **Sida barnaamijku u shaqeeyo – laga bilaabo Oktoobar 1, 2013 – Daryeelka la bixiyay ka hor Oktoobar 1, 2013, la xiriir Kooxda Maamulka Hantida DHS.**

Haddii qof xubin ahi uu ku jiray xarun dadka lagu xanaaneeyo ama xarunta daryeelka oo loogu tala galay dadka maskax ahaan naafada ka ah ama naafanimada korriinka isagoo ku jiray ugu yaraan lix bilood dhimashada ka hor:

Barnaamijka Dib u soo celinta Hantida u qaabilsani wuxuu raadin doonaa in uu kaliya soo celiyo faa'iidooyinkii gargaar ee la siiyay xarunta halka qofka xubinta ahi ku noolaa ka hor inta aanu qofka xubinta ahi noqon 55 jir.

Haddii qofka xubinta ahi uu helayay Medicaid si uu bixiyo qayb ka mid ah ama dhammaan kharashka daryeelka mudada fog:\*

Kooxda dib u soo celinta hantida u qaabilsani waxay raadin doontaa in ay soo ceshato **dhammaan** faa'iidooyinka daryeelka caafimaad, oo ay ka mid yihiin OHP iyo kharashka daryeelka mudada fog ee la bixiyay mudadii uu qofka xubinta ahi helayay faa'iidooyinka gargaar si uu u bixiyo qayb ka mid ah ama dhammaan kharashka qoran ee daryeelka mudada fog la bilaabo marka da'du tahay 55 jir iyo ka sii weyn. Faa'iidooyinka OHP waxaa ka mid noqon kara adeegyada la helay ee la xiriira kharashka adeega "fee-for-service" ama kharashka bishii ee la siiyay CCO.

\* *Daryeelka mudada fog waxaa ka mid ah xarumaha dadka naafada ah, xarumaha daryeelka dadka, guryaha daryeelka dadka waayeelka ah, adeegyada guriga laga bixiyo, xarumaha dadka lagu xanaaneeyo, xarumaha daryeelka ee loogu tala galay dadka maskax ahaan naafada ka ah ama naafanimada korriinka, iyo meelaha kala ee la midka ah ee daryeelka mudada fog.*

### **Medicare Part D ee caymiska daawooyinka la isku qoro**

Dowladda federaalku waxay OHA ku soo dalacdaa lacag la bixinayo bishii oo la xiriirta Medicare Part D ee caymiska daawooyinka la isku qoro oo loogu tala galay qofka xubinta ah ee isticmaala OHP and Medicare labbadoodaba. Waxaa suuragal ah in OHA ay tiradan lacageed dib uga soo ceshato hantida uu leeyahay qofkan xubinta ah. Lacagaha la siiyay dowladda federaalka mudo ku beegnayd ama ka dambaysay Janaayo 1, 2014-kii, waa kuwo dib loo soo ceshan karo kaliya haddii qofka xubinta ah da'diisu ahayd 55 ama ka weynaa markii lacagaha la bixiyay.

### **Qofka qof ay isqabeen ka hara iyo carruurta**

Barnaamijka Dib u soo celinta Hantidu sheegan maayo hantida ilaa qofka qof ay isqabeen ka haray uu ka dhimanayo. Marka qofkii haray uu isna dhinto sheegada waxaa loo gudbin karaa hantida ka hartay qofka geeriyooday. Barnaamijka Dib u soo celinta Hantidu dib u soo ceshan maayo hantida haddii uu qofka xubinta ahi leeyahay oo uu jiro ilme ka haray oo da'diisu ka yar tahay 21 jir, ama ilme da'kasta ah oo aan indho qabin ama si rasmi ah oo buuxda naafo u ah. Naafanimadu waa in ay noqotaa mid buuxinaysa xeerka u yaala Xafiiska Social Security-ga ee loogu tala galay naafanimada rasmiga ah ee buuxda. Ilmuhu waa in uu si caadi ah u dhashay ama uu yahay ilme si sharci ah uu korsaday qof xubin ka ah Medicaid.

*Macluumaadka ku saabsan sida laga yaabo in dadka isku jinsiga ahi ee wada nool ama guurka dadka isku jinsiga ah uu saamayn ugu yeesho dib u soo celinta hantida, waxaad wacdaa Kooxda Maamulka Hantida.*

### **Iska dhaafidda dhibaato jirta awgeed (hardship waivers)**

Qof kasta oo hanti ka helaya hanti uu leeyahay qof xubin ahi waxay OHA ka codsan karaan in ay ka dhaafto dib u soo celinta hantida haddii ay buuxiyaan shuruudaha looga baahan ee loo yaqaan iska dhaafidda dhibaato jirta awgeed (hardship waiver). Tilmaamaha ku saabsan sida loo codsado iska dhaafidda dhibaato jirta awgeed (hardship waiver) waxaa la soo raaciyay macluumaadka ay soo dirto Kooxda Dib u soo celinta Hantida marka ay bilowdo nidaamka dib u soo celinta.

**DHS Estate Administration Unit**  
PO Box 14021  
Salem, OR 97301

1-800-826-5675 (khad bilaash ah haddii aad Oregon ka soo wacaysid)  
503-378-2884  
Fax-ka: 503-378-3137 (Salem)



---

## Xaaladda deganaansho ee loo qalmo

- Sharciga deganaanshaha rasmiga ah (LPR/ Kaarka Deganaanshaha haysta “Green Card”)
- Magan gelyo doonka
- Qoxooti
- Soo galooti Cuban ama Haitian ah
- Lagu sii dhex daayay Maraykanka
- Soo galootinimada shuruudu la socoto ee la oggolaaday ka hor 1980
- Qof xaas ah, carruur, ama waalid la dhibaateeyay
- Qof dhibaato ka soo gaartay tahriibin, iyo xaaskiisa ama ninka qaba, carruur, walaalo, ama waalid
- Qofka xaaladiisu ayna muhaajirka ahayn (waxaa ka mid ah Qofka haysta fiisooyinka shaqada, fiisooyinka ardaynimo, muwaadiniinta u dhashay Micronesia, the Marshall Islands, iyo Palau
- Xaaladda Si Ku Meel Gaar Ah Loo Ilaaliyo (TPS)
- Hakinta Tegidda Qasabka Ah (DED)
- Xaaladda Hakinta Talaabo Qaadida “Deferred Action Status” (Hakinta Talaabo Ka Qaadida Carruurta Timid “Deferred Action for Childhood Arrivals” [DACA] maaha xaalad deganaansho oo loo qalmo marka la codsanayo caymiska caafimaad)
- Dadka qaar ee haysta warqadda oggolaanshaha shaqo
- Diiwaanka codsadyaasha
  - Amarka la socoshada
  - Arjiga Baajinta Saaridda ama Joojinta Masaafurinta
  - Arjiga Sharciiyanta ee hoos timaada IRCA
  - Arjiga Xaaladda Si Ku Meel Gaar Ah Loo Ilaaliyo (TPS)
  - Sharciiyanta hoos timaada xeerka LIFE Act
- La oggolaaday Baajinta Masaafurinta ama Baajinta Saaridda ee hoos yimaada sharciyada socdaalka ama hoos yimaada Heshiiskii ka dhanka ahaa Jirdilka (CAT)
- Arjiga loogu tala galay:
  - Xaaladda Dhalinyarada Muhaajirka ah ee Gaarka ah
  - Wax ka beddelka Xaaladda Sharciga Deganaanshaha Rasmiga ah ee wadata codsi fiise oo la oggolaaday
  - Fiisaha loogu tala galay qof dhibaato ka soo gaartay tahriibin
  - Qofka magan gelyo doonka ah oo la siiyay oggolaanshaha shaqo, ama da’diisu ka yar tahay 14 jir oo haystay arji loogu tala galay magan gelyo doonimada oo hawshiisa wali la sugayo ugu yaraan mudo 180 maalmood ah.
  - Baajinta Masaafurinta ama Baajinta Saaridda ee hoos yimaada sharciyada socdaalka ama hoos yimaada Heshiiskii ka dhanka ahaa Jirdilka (CAT) ee la siiyay oggolaanshaha shaqo, ama da’diisu ka yar tahay 14 jir oo haystay arji loogu tala galay baajinta masaafurinta ama baajinta saaridda ee hoos yimaada sharciyada socdaalka ama hoos yimaada CAT oo hawshiisa wali la sugayo ugu yaraan mudo 180 maalmood ah.
- Sharciga deganaanshaha ku meel gaarka ah
- Wasaarada Amniga Gudaha (DHS) ay bixiyay amar sare oo oggolaansho oo ah in la joogo oo aan la dalka dibadiisa la isku saarin
- Xubin ka tirsan qabiilka Hindida ama Hindida Maraykanka oo ku dhashay Canada oo federal ahaan loo aqoonsan yahay
- Degan American Samoa

**Waxyaalo dheeraad ah oo ku saaban warqadaha deganaanshaha ee loo qalmo ama xaaladdaha sharci, sii soco bogga xiga.**

## Nooca warqadaha socdaalka iyo lambarka warqadaha Aqoonsiga #

Waxaad liiska hoose ka fiirisaa noocyada warqaddo ee inta badan la isticmaalo iyo lambarka Aqoonsiga #. Haddii warqadaha aad haysato aanay liiska ku qornayn, waxaad magaciisa wali ku dul qori kartaa arjiga. Haddii aadan haysan dhammaan macluumaadka, waad iska dhaafi kartaa su'aalaha ku saabsan nooca warqadaha socdaalka iyo lambarka warqadaha Aqoonsiga #.

Haddii aad haysato noocan warqadeed:	Kuwan waxaad qortaa lambarka warqadaha Aqoonsiga #:
Kaarka Degenaanshaha Rasmiga ah "Green Card" (I-551)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi: Lambarka kaarka:
Ogolaanshaha Dib u soo gelidda (I-327)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi:
Warqadda Qoxootigu ku Safro (I-571)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi:
Kaarka Oggolaanshaha Shaqo (I-766)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi: Lambarka kaarka: Taariikhda uu ku eg yahay Nooca astaanta
Fiisaha Mishiinku Aqoonsan karo ee Muhaajirka (ee sida kooban wax u akhriya I-551)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi: Lambarka baasaboorka
Shaabadda ee Ku meel gaarka ah I-551 (ee baasaboorku lagu dhufto ama I-94/I-94A)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi:
Diiwaanka Imaanshaha/Bixida (I-94/I-94A)	Lambarka I-94
(Diiwaanka Imaanshaha/Bixida) ee baasaboorka aanu wakhtigiisii dhicin (I-94)	Lambarka I-94 Lambarka baasaboorka Taariikhda uu ku eg yahay Dalka soo sooray
Baasaboorka Qalaad	Lambarka baasaboorka Taariikhda uu ku eg yahay Dalka soo sooray
Warqadda u Qalmidda ee la xiriirta Xaaladda Ardayga aan Muhaajirka ahayn (I-20)	Aqoonsiga SEVIS
Warqadda u Qalmidda ee la xiriirta Xaaladda Qof Booqasho Meel ku yimaada (DS2019)	Aqoonsiga SEVIS
Ogaysiiska Talaabo Qaadida (I-797)	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi ama lambarka I-94
Waxyaalo kale	Lambarka Diiwaan gelinta Ajnabi ama lambarka I-94 Sharaxaada nooca ama magaca warqadaha

**Waxyaalo dheeraad ah oo ku saaban warqadaha deganaanshaha ee loo qalmo ama xaaladdaha sharci, sii soco bogga xiga.**



---

## Nooca warqadaha socdaalka iyo lambarka warqadaha Aqoonsiga #, ayaa wali lagu jiraa

Sidoo kale waxaad qori kartaa warqadahan iyo xaaladdaha sharci:

- Warqadaha tilmaamaya xubin ka tirsan qabiilka Hindida ama Hindida Maraykanka oo ku dhashay Canada oo federal ahaan loo aqoonsan yahay (Ogow: Tani waxaa loo tixgeliyaa xaalad deganaansho oo loo qalmo Medicaid, laakiin maaha Qorshe Caafimaad oo loo Qalmo [QHP].)
  - Warqada u qalmidda ee Xafiiska Dib u dejinta Qoxootiga (ORR) (haddii laga yar yahay 18 jir)
  - Warqadaha tilmaamaya baajinta saaridda
  - Amar sare oo ah in la joojo oo aan la dalka dibadiisa la isku saarin oo ay bixisay Wasaarada Amniga Gudaha (DHS)
  - Warqad ka socota Waaxda Caafimaadka Maraykanka iyo Adeegyada Dadweynaha (HHS) Xafiiska Dib u dejinta Qoxootiga (ORR)
  - Soo galooti Cuban ama Haitian ah
  - Degan American Samoa
-

**Macluumaadkaada.  
Xuquuqdaada.  
Waajibaadkayaga.**

Ogaysiiskan wuxuu sharaxayaa sida macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan laga yaabo in loo isticmaalo ama loo bixiyo iyo sida aad u heli karto macmuulaadkani. **Fadlan si taxadir leh u eeg.**

**Xuquuqdaada**

**Waxaad xaq u leedahay:**

- In aad hesho nuqulka diiwaannadaada caafimaad iyo waxyaalaha aad sheegato
- In aad saxdo diiwaankaaga caafimaad iyo waxyaalaha aad sheegato
- In aad codsato waxyaalaha sirta ah ee la isdhaafsaday
- In aad naga codsato in aanu xadidno macluumaadka aan dadka la wadaagno
- In aad hesho liiska dadka aan macluumaadkaaga la wadaagnay
- In aad hesho nuqul la xiriira ogaysiiska waxyaalaha qofka u gaarka ah
- In aad doorato qof adiga wakiil kaa noqda
- In aad cabasho soo gudbiso haddii aad dareento in xuquuqdaadii gaarka ahayd lagu xadgudbay

» **Fiiri bogga 2** si aas u hesho macluumaad *dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqahan iyo sida loo isticmaalo*

**Kala Doorashadaada**

**Waxaa jira waxyaalo aad kala dooran karto oo la xiriira sida aanu isticmaalno macluumaadka sidoo kalena dadka ula wadaagno marka aan:**

- Ka jawaabayno su'aalaha ku saabsan caymiska ee laga helay qoyskaaga iyo saaxiibadaa
- Bixinayno gargaarka masiibooyinka
- Suuq geynayno adeegyadayada sidoo kalena gadayno macluumaadkaaga

» **Fiiri bogga 3** si aad u hesho macluumaad *dheeraad ah oo ku saabsan waxyaalahan i a kala dooranayo iyo sida loo isticmaalo*

**Isticmaalkayaga iyo Bixintayada**

**Waxaa suuragal ah in aanu isticmaalno macluumaadkaada sidoo kalena dadka la wadaagno marka aan:**

- Taageerada ka geysanayno maaraynta daaweynta daryeelka caafimaadka ee aad hesho
- Wadano shaqada ururkayaga
- Bixinayno adeegyadaada caafimaad
- Maamulayno qorshahaaga caafimaad
- Taageerada siinayno caafimaadka dadweynaha iyo arrimaha la xiriira badbaadada
- Baaritaanka samaynayno
- Sharciga raacayno
- Jawaab ka bixinayno codsi deeq ah oo la xiriira xubnaha iyo unugyada qofka anagoo la shaqaynayna qof wax baara oo caafimaadka u qaabilsan ama maamulaha goobta maydka lagu hayo
- Wax ka qabanayno codsiyada la xiriira magdhawga shaqaalaha, ciidanka ammaanka, iyo qaybaha kale ee dowladda
- Jawaab ka bixinayno dacwadaha maxkamadda loo gudbiyay (lawsuits) iyo talaabooyinka sharci

» **Fiiri bogga 3 iyo 4** si aad u hesho macluumaad *dheeraad ah oo ku saabsan waxyaalahan la kala dooranayo iyo sida loo isticmaalo*

## Xuquuqdaada

### Marka ay noqoto macluumaadkaaga caafimaad, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah.

Qaybtani waxay sharaxaysaa xuquuqdaada iyo qaar ka mid ah waajibaadka naga saaran in aan ku taageerno.

#### In aad hesho nuqulka diiwaannadaada caafimaad iyo waxyaalaha aad sheegato

- Waxaad codsan kartaa in aad aragto ama hesho nuqulka diiwaannadaada caafimaad iyo waxyaalaha aad sheegato iyo macluumaadka kale ee caafimaad ee aad kaa hayno. Na waydii sida tani loo sameeyo.
- Waxaan bixin doonaa nuqul ama warbixin kooban oo ku saabsan diiwaannadaada caafimaad iyo waxyaalaha aad sheegato, sida caadiga ah 30 maalmood gudahood laga bilaabo marka aad codsato. Waxaa suuragal ah in aan kaa qaadno lacag macquulka, oo kharashka ku salaysan.

#### In aad codsato in aanu saxno diiwaanka caafimaad iyo waxyaalaha aad sheegato

- Waxaad naga codsan kartaa in aanu saxno diiwaannadaada caafimaad iyo waxyaalaha aad sheegato haddii aad is leedahay waa khalad ama ma dhamaystirna. Na waydii sida tani loo sameeyo.
- Waxaa suuragal ah in aan codsigaaga diidno oo dhahno “maya”, laakiin qoraal ahaan ayaan mudo 60 maalmood gudahood kuugu sheegi doonaa sababta.

#### In aad codsato waxyaalaha sirta ah ee la isdhaafsaday

- Waxaad naga codsan kartaa in aan kuula soo xiriirno hab gaarka (tusaale, telefoonka guriga ama xafiiska ama warqad aan u dirno cinwaan kale).
- Tixgelin ayaan siin doonaa dhammaan codsiyada macquulka ah anagoo dhahayna “haa” haddii aad noo sheegto in aad khatar kula soo dersi doonto haddii aan tixgelin wayno.

#### In aad codsato in aanu xadidno waxaan isticmaalno ama dadka la wadaagno

- Waxaad naga codsan kartaa **in aanan** dadka la wadaagin macluumaadka caafimaad ee daaweynta, lacag bixinta, ama hawlaha aan qabano qaarkood.
- Naloogama baahna in aan kugu raacno codsigaaga, iyadoo ay suuragal tahay in aan dhahno “maya” haddii ay raad ku yeelanayso daryeelkaaga.

#### In aad hesho liiska dadka aan macluumaadka la wadaagnay

- Waxaad codsan kartaa liiska (diiwaanka) wakhtiyada aan macluumaadkaaga caafimaad dadka la wadaagnay lixda sano ah ee horaysa taariikhda aad codsato, cida aan la wadaagnay, iyo sababta aan ula wadaagnay.
- Waan soo raacin doonaa dhammaan waxyaalaha aan bixinay marka laga reebo daaweynta, lacagta, iyo hawlaha daryeelka caafimaadka, iyo waxyaalaha kale ee la bixiyo qaarkood (sida kuwa aad na waydiiso in aan samayno). Waxaan bixin doonaa liiska diiwaanka oo hal sano ah isagoo lacag la'aan ah laakiin waxaan qaadi doonaa lacag macquulka, oo kharashka ku salaysan haddii aad diiwaan kale ku codsato mudo 12 bilood gudahood ah.

#### In aad hesho nuqul la xiriira ogaysiiska waxyaalaha qofka u gaarka ah

- Waxaad markasta codsan kartaa nuqulka warqadan ogaysiinta, haddii aad heshiis ku gaartay in aad ogaysiinta u hesho hab elektaroonig ah. Si dhakhso ah ayaan nuqulka warqada kuu siin doonaa.

#### In aad doorato qof adiga wakiil kaa noqda

- Haddii aad qof siisay awood uu wakiil kaaga noqdo ama haddii qof uu yahay mas'uulkaaga sharciga ah, qofkaasi ayaa isticmaali kara wixii xuquuq ah ee aad leedahay sidoo kalena go'aan ka gaari kara macluumaadkaaga caafimaad.
- Waxaan xaqiijin doonaa in qofkani uu leeyahay awooddan oo uu wakiil kaa noqon karo ka hor inta aanu qaadin wax talaabo ah.

#### In aad cabasho soo gudbiso haddii aad dareento in xuquuqdaadii lagu xadgudbay

- Cabasho ayaad gudbin kartaa haddii aad dareento in aanu xuquuqdaadii ku xadgudubnay adigoo nala soo xiriirayo oo isticmaalaya macluumaadka ku qoran bogga 1.
- Cabasho ayaad u gudbin kartaa Waaxda Caafimaadka Maraykanka iyo Adeegyada D adweynaha Xafiiska Xuquuqda Dadweynaha adigoo warqad u diraya 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201, wacaaya 1-877-696-6775, ama booqanaya [www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/](http://www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/).
- Kaa aargoosan mayno gudbinta aad gudbinayso cabasho.

**Kala Doorashadaada**

**Macluumaadka caafimaad qaarkood, waxaad noo sheegi kartaa waxyaalaha aad kala doornayso ee la xiriira waxa aan dadka la wadaagno.** Haddii ay jirto mid aad doorbidayso oo la xiriirta sida aan macluumaadkaaga dadka ula wadaagno ee xaaladaha hoosta ku qoran, nagala hadal. Noo sheeg waxa aad rabto in aanu samayno, anaguna waan raaci doona tilmaamahaaga.

**Ma ay jiraan xaaladahan oo kale, waxaad leedahay xuquuqda iyo kala doorashada labbadoodaba ee aad noogu sheegayso in aan:**

- Macluumaadka caafimaad la wadaagno qoyskaaga, saaxiibada aad isku dhow dihiin, iyo dadka kale ee qaybta ka ah bixinta lacagta daryeelkaaga
- Macluumaadkaaga dadka la wadaagno marka ay jirto xaaladda gargaarka masiibooyin

*Haddii aad awooddi waydo in aad noo sheegto mida aad doorbidayso, tusaale haddii aad miyir beeshid, waxaa suuragal ah in aan sii wadno in macluumaadkaaga aan dadka la wadaagno haddii aan xaqiiqsano in tani adiga dan kuu tahay. Waxaa sidoo kale suuragal ah in aad macluumaadkaaga dadka la wadaagno marka loo baahdo in la yareeyo dhibaato halis ah oo soo fool leh oo la xiriirta dhanka caafimaadka ama badbaadada ah.*

**Ma ay jiraan xaaladahan oo kale marnaba macluumaadkaaga dadka lama wadaagno adigoo na siiya oggolaansho qoraal ah:**

- Ujeedooyinka la xiriira suuq-gaynta
- Gadida macluumaadkaaga
- Qoraalada daaweynta maskaxda la xiriira intooda badan

**Isticmaalkayaga iyo Bixintayada**

**Sidee baan caadi ahaan macluumaadkaaga caafimaad u isticmaalnaa ama dadka ula wadaagnaa?** Caadi ahaan waxaan macluumaadkaaga caafimaad u isticmaalnaa ama dadka ula wadaagnaa hababka soo socda.

**Taageerada ka geysanayno maaraynta daaweynta daryeelka caafimaadka ee aad hesho**

- Waan isticmaali karnaa macluumaadkaaga caafimaad anagoo sidoo kale la wadaagayna dadka khibradaha leh ee ku daaweynaya.

**Tusaale:** Dhakhtar ayaa noo soo dira macluumaadka ku saabsan xanuunkaaga iyo qorshahaaga daaweyn si aan u qorshayno adeegyo dheeraad ah.

**Wadano shaqada urrurkayaga**

- Waan isticmaali karnaa sidoo kalena waan bixin karnaa macluumaadkaaga si aan u wadano shaqada urrurkayaga ama u isticmaalno in aan kugula soo xiriirno marka loo baahdo.
- **Nalooma ogola in aan isticmaalno macluumaadka la dhowray ee ku saabsan isirka si aan go'aan uga gaarno haddii ay tahay in aanu ku siino caymis iyo qiimaha caymiskaagi ku kacayo.** Tani ma khusayso qorshayaasha daryeelka mudada fog.

**Tusaale:** Waxaan macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan u isticmaalnaa si aan samayno adeegyo kuu fiican.

**Bixinayno adeegyadaada caafimaad**

- Waan isticmaali karnaa sidoo kalena waan bixin karnaa macluumaadkaaga caafimaad marka aan bixinayno adeegyadaada caafimaad.

**Tusaale:** Waxaan macluumaadka adiga kugu saabsan la wadaagnaa qorshahaaga ilkaha si la iskugu duwo bixinta lacagta ee shaqada ilkahaaga laga qabtay.

**Maamulayno qorshahaaga**

- Waxaa suuragal ah in aan bixino macluumaadkaaga caafimaad oo siino qofka dhaqaalaha u qaabilsan qorshahaaga caafimaad si qorshaha loo maamulo.

**Tusaale:** Shirkadaada ayaa qandaraas nagu siisa in aan bixino qorshe caafimaad, anagoo shirkadaada siina xisaabaadka qaarkood si aan ugu sharaxno lacagta caymiska ee aan qaadano.

## **Sidee kale ayaan macluumaadkaaga caafimaad u isticmaali karnaa ama dadka ula wadaagnaa karnaa?**

Waa nalloo ogol yahay ama waxaa nalooga baahan yahay in aan macluumaadkaaga dadka ula wadaagno habab kale – sida caadiga ah habab bulshada wax u tara, sida caafimaadka dadweynaha iyo cilmi baarista. Waa inaanu buuxinaa shuruudo badan oo sharciyo dhigayo ka hor intaanu macluumaadkaaga dadka la wadaagin ujeedooyinkan awgood. Wixii macluumaad dheeraad ah fiiri:

[www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html](http://www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html).

### **Taageerada siinayno caafimaadka dadweynaha iyo arrimaha la xiriira badbaadada**

- Waxaan macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan dadka la wadaagi karnaa marka ay jiraan xaaladdo gaar ahi sida:
  - Ka hortagga cudurada
  - Taageerada alaabta la soo celiyo
  - Soo sheegida dhibaata waxyeelo ee daawooyinku keenaan
  - Soo sheegida shaki laga qabo xadgudub la geystay, dacayad, ama rabshadaha qoyska
  - Ka hortagga ama yaraynta dhibaato halis dhanka caafimaadka ah ama badbaadada oo qof ku timaada

### **Baaritaanka samaynayo**

- Waxaan macluumaadkaaga u isticmaali karnaa ama dadka ula wadaagi karnaa si cilmi baaris caafimaad loo sameeyo.

### **Sharciga raacayno**

- Waxaan dadka la wadaagi doonaa macluumaadka adiga kugu saabsan haddii sharciyada gobolka iyo federaalku taasi dhigayaan, taasi oo ay ka mid tahay Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadweynaha haddii ay rabto in ay aragto in aan raacayno sharciga gaarka ah ee federaalka iyo in kale.

### **Jawaab ka bixinayno codsi deeq ah oo la xiriira xubnaha iyo unugyada qofka anagoo la shaqaynayna qof wax baara oo caafimaadka u qaabilsan ama maamulaha goobta maydka lagu hayo**

- Waxaan macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan la wadaagi karnaa ururada u qaabilsan helidda xubnaha qofka.
- Waxaan macluumaadka caafimaad la wadaagi karnaa qof baara dhimashada, qof u qaabilsan baaritaanka caafimaad, maamulaha goobta maydka lagu hayo marka qof dhinto.

### **Wax ka qabanayno codsiyada la xiriira magdhawga shaqaalaha, ciidanka ammaanka, iyo qaybaha kale ee dowladda**

- Waxaan macluumaadkaaga adiga kugu saabsan u isticmaali karnaa ama dadka ula wadaagi karnaa:
  - Sheegashooyinka magdhawga shaqaalaha
  - Ujeedooyin la xiriira ciidanka ammaanka ama sargaal ka tirsan ciidanka ammaanka
  - Hay'adaha kormeerka caafimaadka ee qabanaya hawlo uu sharciyo ogol yahay.
  - Qaybaha gaarka ah ee dowladda sida ciidanka, ammaanka qaranka, iyo adeegyada badbaadinta madaxweynaha

### **Jawaab ka bixinayno dacwadaha maxkamadda loo gudbiyay (lawsuits) iyo talaabooyinka sharci**

- Waxaan macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan dadka la wadaagi karnaa iyadoo laga jawaabayo amar maxkamadeed ama maamul.

- I. Waxaa suuragal ah in OHA isticmaasho ama bixiso macluumaadka caafimaad ee sharciyo dhowrayo (PHI) ee laga helo foomamka isdiiwaan gelinta si ay taageero uga geysato gaarida go'aanka nooca barnaamijyo ee aad u qalanto ama nooca caymis ee ay tahay in aad hesho.
- II. OHA waxay raacdaa waxyaalaha ay uga baahan yihiin sharciyada gaarka ee federaalka iyo gobolku, kuwaasi oo ay ka mid yihiin sharciyada ku saabsan isticmaalka aalkolada iyo daroogada iyo daawaynta iyo xaaladdaha caafimaadka dhimirka iyo daawaynta.
- III. Waxaa suuragal ah in OHA isticmaasho ama bixiso diiwaannada xadgudubka mukhaadaraadka haddii qofku ama ganacsiga helaya diiwaannadu ay heshiis gaar ah la galeen OHA.
- IV. Haddii OHA ay macluumaad siiso qof kale adigoo ogol, macluumaadkaasi waxaa suuragal ah in aanay dhawrin sharciyada gaarka ahi iyadoo qofka helaya macluumaadku ay suuragal tahay in aanu dhowrin macluumaadka. Waxaa suuragal ah in ay macluumaadkaaga siiyaan qof kale adigoo ogolaansho bixin.

## Waajibaadkayaga:

- Sharci ahaan waxaa nalooga baahan yahay in aan ilaalino gaar ahaanshaha iyo badbaadada macluumaadkaaga caafimaad ee sharcigu dhowrayo.
- Si dhakhso ah ayaan kuugu soo sheegi doonaa haddii ay dhacdo in sharciga la jebiyo kaasi oo laga yaabo in uu waxyeeladay gaar ahaanshihi iyo badbaadadii macluumaadkaaga.
- Waa in aanu raacnaa waajibaadka iyo dhacdooyinka asturan ee lagu qeexay ogaysiintani oo aan ku siinaa nuqul ka mid ah.
- Macluumaadkaaga isticmaali mayno sidoo kalena dadka la wadaagi mayno marka laga reebo sida halkan lagu qeexay adigoo qoraal ahaan nooga sheega in aan taasi samayn karno maahane. Haddii aad noo sheegto in aan taasi samayn karno, markasta ayaad fikirkaaga beddeli kartaa. Qoraal ahaan nagula soo socodsii haddii aad bedesho fikirkaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah fiiri: [www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html](http://www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html).

## Isbeddelada Hadalada ku qoran Ogaysiintani

Waan beddeli karnaa hadalada ku qoran ogaysiintani, iyadoo isbeddeladu ay khusayn doonaan dhammaan macluumaad aan kaa hayno. Ogaysiinta cusub marka la codsado waxaa laga helayaa website-kayaga, nuqul ayaanan boosta kuugu soo diri doonaa.

*Waxaa ogolaatay by Suzanne Hoffman, COO 2-14-2014*

***Ogaysiiskan Dhacdooyinka Asturan wuxuu khuseeyaa Maamulka Caafimaadka Oregon iyo dadka ganacsi ahaan xiriirka la leeyihiin, oo ay ka mid tahay Waaxda Adeegyada Dadweynaha Oregon.***

***Si aad u isticmaasho wixii la xiriira xuquuqda gaarka ah ee kor ku qoran waxaad la xiriiri kartaa xafiiskaaga degaanka ee OHA.***

***Si aad u codsato ogaysiintan oo ku qoran luqad kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, ama qaab kale wac 503-378-3486, Fax-ka 503-373-7690 ama TTY 503-378-3523. Waxaa la helayaa isagoo ku qoran Ingiriisa sidoo kalena lagu turjumay Isbaanish, Af-Ruushka, Vietnamese, Soomaali, Af-Carabi, Burmese, Bosnian, Cambodian, Korean, Laotian, Portuguese, Afka-Shiinaha, farta waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille.***

## OREGON HEALTH AUTHORITY (MAAMULKA CAAFIMAADKA OREGON)

Privacy Officer

500 Summer Street NE, E-24

Salem, OR 97301

**Email-ka:** [dhs.privacyhelp@state.or.us](mailto:dhs.privacyhelp@state.or.us)

**Taleefoonka:** 503-945-5780

**Fax-ka:** 503-947-5396